



بسم الله الرحمن الرحيم

الحمد لله رب العالمين وصلى الله على سيدنا محمد وعلى آله وصحبه الطيبين الطاهرين وبعد.

فإن الاحتفال بذكرى مولد سيدنا محمد ﷺ الذي أرسله الله رحمة للعالمين بقراءة شيء من القراءان وذكر شيء من الشمائل النبوية الشريفة أمر فيه بركة وخير عظيم إذا خلا هذا الاحتفال عن أصناف البدع القبيحة التي لا يستحسنها الشرع الشريف.

وليعلم أن تخليل أمر أو تحريم إما هو وظيفة المحتهد كإمام مالك والشافعي وأبي حنيفة وأحمد بن حنبل رضي الله عنهم وعن سائر السلف الصالح ، وليس لأي شخص ألف مؤلفاً صغيراً أو كبيراً أن يأخذ وظيفة الأئمة الكرام من السلف الصالح فيُحلل ويحرّم دون الرجوع إلى كلام الأئمة المحتهدين المشهود لهم بالخيرية من سلف الأئمة وخلفها، فمن حرم ذكر الله عز وجل وذكر شمائل النبي صلى الله عليه وسلم في يوم مولده عليه السلام بحجة أن النبي عليه السلام لم يفعله.

فتقول له: هل تحرّم المخاريب التي في المساجد وتعتقد أنها بدعة ضلال؟! وهل تحرّم جمع القراءان في المصحف ونقطه بدعوى أن النبي لم يفعله؟! فإن كنتَ تحرّم ذلك فقد ضيقـتـ ما وسـعـ اللهـ عـلـىـ عـبـادـهـ من استحداثـ أـعـمـالـ خـيـرـ لمـ تـكـنـ عـلـىـ عـهـدـ الرـسـوـلـ، فـقـدـ قـالـ رـسـوـلـ اللهـ ﷺـ: "مـنـ سـنـ فـيـ الإـسـلـامـ سـنـةـ حـسـنـةـ فـلـهـ أـجـرـهـاـ وـأـجـرـ مـنـ عـمـلـ هـاـ بـعـدـ مـنـ غـيـرـ أـنـ يـنـقـصـ مـنـ أـجـورـهـمـ شـيـءـ" رـوـاهـ إـلـيـمـ مـسـلـمـ فـيـ صـحـيـحـهـ ، وـقـالـ سـيـدـنـاـ عـمـرـ بـنـ اـخـطـابـ رـضـيـ اللـهـ عـنـهـ بـعـدـ مـاـ جـمـعـ النـاسـ عـلـىـ إـمـامـ وـاحـدـ فـيـ صـلـاـةـ التـرـاوـيـحـ: "نـعـمـ الـبـدـعـةـ هـذـهـ" رـوـاهـ إـلـيـمـ الـبـخـارـيـ فـيـ صـحـيـحـهـ.

ومن هنا قال الإمام الشافعي رضي الله عنه : "المحادثات من الأمور ضربان أحدهما: ما أحدثت مما يخالف كتاباً أو سنةً أو أثراً أو إجماعاً، فهذه البدعة الضلال، والثانى: ما أحدثت من الخير لا خلاف فيه لواحد من هذا، وهذه محدثة غير مذمومة". رواه الحافظ البيهقي في كتاب "مناقب الشافعى" ج 1 ص 469.

ومن شاء فلينظر ما ذكره الحافظ ابن حجر العسقلاني رحمه الله من "أن الاحتفال بالمولد النبوى الشريف بدعة حسنة" ولا تصح فتوى من أفتى بأن الاحتفال بذكرى المولد بدعة محمرة لما تقدم من الأدلة ومثل ذلك ذكر العلماء الذين ثعنـمـدـ فـوـاهـمـ كـالـحـافـظـ اـبـنـ دـحـيـةـ وـالـحـافـظـ الـعـرـاقـيـ وـالـحـافـظـ السـخـاوـيـ وـالـحـافـظـ السـيـوطـيـ وـالـشـيـخـ اـبـنـ حـجـرـ الـهـيـتمـيـ وـالـشـيـخـ محمدـ بـنـيـتـ الـطـيـعـيـ مـفـتـيـ الـدـيـارـ الـمـصـرـيـةـ الـأـسـبـقـ وـالـشـيـخـ مـصـطـفـيـ نـجـاـ مـفـتـيـ بـرـوـتـ الـأـسـبـقـ وـغـيـرـهـمـ كـثـيرـ، وـلـاـ عـبـرـةـ بـكـلـامـ مـاـ أـنـقـصـ قـوـلـهـمـ لـأـنـ لـيـسـ كـلـامـ مجـتـهدـ ، وـالـعـبـرـةـ إـنـاـ هـيـ بـاـعـقـ كـلـامـ الـعـلـمـاءـ الـمـعـتـرـبـينـ ، وـالـأـصـلـ فـيـ الـأـشـيـاءـ الـإـبـاحـةـ مـاـ لـمـ يـرـدـ التـحـرـيمـ ، وـدـيـنـ اللـهـ يـسـرـ وـلـيـسـ بـعـسـرـ ، وـالـلـهـ الـهـادـيـ إـلـىـ سـبـيلـ الرـشـادـ.

نـسـأـلـ اللـهـ أـنـ يـجـمـعـنـاـ وـإـيـاـكـمـ عـلـىـ نـشـرـ الـخـيـرـ وـيـفـيـضـ عـلـيـنـاـ مـنـ بـرـكـاتـ النـيـيـرـ مـحـمـدـ ﷺـ. عـاـمـيـنـ

ملاحظة: (لا ترم هذه الورقة على الأرض لوجود أسماء معظمه عليها)



بسم الله الرحمن الرحيم

الحمد لله رب العالمين وصلى الله على سيدنا محمد وعلى آله وصحبه الطيبين الطاهرين وبعد:

Qabashada Xafladda lagu maamuusayo dhalashadii Nabigeenii Muxamad nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, kaas oo uu Eebbe ugu soo diray dunida naxariis ahaan, ayada oo la akhrinayo aayado Quraanka ka mid ah, lana sheegayo qaar ka mid ah wanaagga nabigiinii sharafta lahaa, waa arrin barako iyo khayr badani ku jiraan, haddii ay ka marnaato xafladdaasi waxyabaha bidcada ah ee xun ee aanan sharcigennu ogolayn.

Waana in la ogaado in xalaalaynta arrimaha ama xaaraamayntoodu ay tahay howsha columada waawayn sida Imaam Maalik iyo Shaafici iyo Abii Xaniifa iyo Axmad bin Xambal Allaha ka raalli noqdee ayaga iyo selefkii wanaagsanaaba, xaq uma laha qof buug yar qoray ama mid wayn in uu qaato howshii columada waawayn ee selefkii wanaagsanaa ka mid ahaa oo uu kolkaa wax xalaaleeyo ama xaaraameeyo asiga oo aan u laaban hadalkii columada waawayn, kuwaa oo ummadda Islaamka kuwii hore iyo kuwii dambe intuba u qireen in ay ahalu khayr ahaayeen, hadaba qofkii xaaraameeya xusidda Eebbe waynaayee, iyo sheegidda wanaaggii Nabiga nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee maalinta uu dhashay, nabadgelyo korikiisa ha ahaatee, ee ku andacooda in aanan nabigu sida falin, waxaannu ku leenahay: **Ma xaaraamaynaysaa mixraabyada masaaqidyada loo sameeyay oo waxaad aaminsantahay in ay bidco lagu lumayo tahay?!** Mise xaaraamaynaysaa aruurintii quraanka lagu soo aruershay hal kitaab iyo dhibcayntiisii adiga oo ku andaconaya in aanan nabigu samayn?!

Haddii aad waxyaabahaas xaaraamaynayso, waxaad cariiri gelisay waxyaabihii uu Eebbe u ballaарshay addoomihiisa ee ay ka mid yihiin samaynta falal khayr ah oo aan la aqoon waagii nabiga, Wuxuuna yiri Nabigii Alle, Nabadgelyo iyo Naxariisi korkiisa ha ahaatee: **(Qofkii Islaamka ku soo dara fal wanaagsan, wuxuu leeyahay ajirkiisa iyo ajirka qofkii asiga ka dib fala, ayada oo aan waxba laga naaqusin dadkaa ajirkooda)** Waxaa soo weriyay Imaam Muslim oo ku soo weriyay Saxiixiisa.

Wuxuuna yiri Khalifkii Cumar bin al-Khaddaab, Allaha ka raalli noqdee, kolkii uu dadka oo dhan kulmiyay si ay ugu daba tukadaan hal imam salaadda taraawiixda: **"Waxaa la mahadshay bidcada tan"** Wuxuu ku soo weriyay Imaam al-Bukhaari saxiixiisa.

Sidaa darted wuxuu yiri Imaam Shafici, Allaha ka raalli noqdee: "Waxyaabaha dadku samaynayaan waa labo, mid waa wixii fal ah ee khilaafaya Kitaabka ama Sunnada ama Asaxaabta warkoodi ama Ijmaaca, kaasi waa bidco xun. Midda labaadna waa wixii khayr ah ee lafalo tasna cidi iskuma khilaafsan, waana wax lafalay nabiga kadib oo aan xumayn" waxaa soo weriyay xaafidkii Bayhaqi ahaa kitaabkiisa "Manaaqib as-Saaficiy" juska 1aad, bogga 469.

Qofkii doonana ha eego wixii uu qoray xaafidkii ibn al-Xajar al-Casqalaani, Eebbe ha u naxariistee, ee ahaa "in xafladda mowlidka Nabiga sharafta leh ay tahay fal nabiga kadib la falay oo wanaagsan" mana ansaxayso fatwada dadka fatwooday in xafladda xuska mowlidku bidco xaaraan ah tahay, addilladii la soo sheegay awgeed, sidaas si la mid ah ayaanaa columada lagu kalsoonyahay fatwadoodu tahay sida xaafidkii ibn Duxaya iyo Xaafidkii al-Ciraaqi, iyo Xaafidkii as-Sakhaawi, iyo Xaafidkii as-Sayuudi, iyo Skeekh ibn al-Xajar al-Haytami, iyo sheikh Maxammad Bakhiit al-Mudiiciyi muftigii dalka Masar ee hore, iyo Sheekh Mustafa Najaa muftigii Bayruut ee hore iyo qaar kale oo badan, warkiisu wax ka oo qaad malaha ninkii fatwo ku baxsha wax hadalkooda khilaafsan, maxaa yeelay hadalkiisu hadal mujtahid ma aha, waxaana lagu cibra qaataa wixii waafaqsan hadalka columada lagu kalsoonyahay, amuuraha oo dhanna asalkoodu waa mubaax, haddii aanan diintu xaaraamayn, diinta Ilaaheyina waa fudayd ee culays ma aha, Ilaahe baana ah kan dadka waddada toosan tusa.

Waxaan Ilaahey waydiisanaynaa in uu inagu mideeyo fidinta khayrka, inagana waraabsho barakada Nabiga Muxamad ah Nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee. Aamiin.

Fiiro Gaar ah: (Ha ku tuurin xaashadan dhulka maxaa wacay waxaa ku qoran magacyo mudnaan leh)